FINAL DRAFT FOR SIGNATURES

HESHIISKA BOOLIISKA IYO DADWEYNAHA ST. CLOUD

(ST. CLOUD COMMUNITY POLICING AGREEMENT)

HORDHAC

Heshiiska Booliiska iyo Dadweynaha St. Cloud (oo qoraalkan loogu yeerayo "Heshiiska") waa natiijo ka soo baxday wadahadal badan iyo wadashaqeyn daacadnimo ah oo u dhaxeysay Waaxda Booliiska St. Cloud iyo xubno ka mid ah dadweynaha St. Cloud. Heshiiska wakhtiga xaadirka wuxuu ku dhisan yahay noocii 2005-tii si uu uga turjumo wixii lala kulmay 12-kii sano ee la soo dhaafay iyo si uu gogoldhig aasaas ah ugu noqdo xiriirka mustaqbalka ee booliiska iyo dadweynaha.

Heshiisku waxaa lagu fulinayaa dhowr arrimood. Kow, waxaa laga helayaa taariikhdii hawsha heshiiska, iyada oo lagu rajo weyn yahay in lagu unko wax dhab ah iyo dahfurnaan. Laba, wax uu sharxayaa habraacyo muhiim ah oo khuseeya Caddaaladda iyo Dhexdhexaadnimada Booliiska iyo Habraaca Cabashada. Saddex, waxa uu qof kasta xusuusinayaa in aysan guulgaariddu ku xirneyn oo keliya Waaxda Booliiska St. Cloud balse ay sidoo kale ku xiran tahay dadweynaha oo dhan (Xiriirka Dadweynaha).

Inkastoo qoreyaasha Heshiiska ay ka wada shaqeeyeen in ay ka dhigaan mid aad u cad oo u adag, haddana waxay garwaaqsadeen baahida loo qabo dibu-eegis iyo in tixgelin labaad lagu sameeyo mustaqbalka iyadoo la eegayo wixii cusub ee lala kulmo.

ASALKII IYO TAARIIKHDII

Heshiiskii 2005-tii

Sannadihii 2004 iyo 2005, Waaxda Booliiska St. Cloud iyo ururro badan oo dadweyne ayaa kulmay si ay uga wada hadlaan booliiska iyo dadweynaha. Ururradii asalkii hore ee ka qeybgalay waxay ahaayeen:

St. Cloud Police Department, African American Male Forum, Hands Across the World, High Ground Church of God in Christ, Hispanic Business Association, Isaiah's Great River Interfaith Partnership (GRIP), Nu Way Missionary Baptist Church, Refugee Employment and Social Services of Lutheran Social Services, Resurrection AME Zion, St. Cloud Area Somali Salvation Organization (SASSO), St. Cloud Korean Baptist Church, United Migrant Opportunity Services (UMOS).

Waaxda Booliiska St. Cloud iyo ururrada kor ku xusan waxa ay kulmeen 22-kii Julaay, 2004, 23-kii Ogoosto, 2004, 30-kii Sebtembar, 2004, 6-dii Oktoobar, 2004, 10-kii Nofeembar, 2004, 15-kii Diseembar, 2004, 7-dii Jannaayo, 2005, 26-kii Maajo, 2005, 30-kii Abriil, 2005, 17-kii Meey, 2005, iyo 21-kii Juun, 2005. Kulmada waxaa bilaabay ururrada ka qeybgalaayey si ay gacan uga geystaan in laga wada hadlo walaaca saameynta ku yeeshay xiriirrada isirka iyo xiriirrada shacabka iyo booliiska Magaalada St. Cloud, Minnesota oo waxaa sabab u ahaa maamulka Gobolka markii ay dhaqaale ku bixiyeen Warbixinta Beegsiga Isirka Gaarka Ah ee Waaxda Booliiska St. Cloud.

Wakiillo ka socday Waaxda Booliiska St. Cloud, ururrada dadka tirada yar ama dadka laga tira badan yahay, iyo ururrada kale oo dadweynayha ayaa soo jeediyey qorsheyaal lagu daray Heshiiskii 2005-tii si loogu hagaajiyo xiriirka u dhaxeeya dadweynaha iyo Waaxda Booliiska St. Cloud.

Wax-ka-beddelkii 2017-18

Laga soo bilaabo Feberaayo, 2017 ilaa Feberaayo 2018, Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay la kulmeen ururrada dadweynaha iyo xubno dadweyne si la isula eego heshiiska iyo si looga beddelo wixii ka turjumaya oo lagama maarmaan u ah isbeddelladii iyo xaaladihii lagu jiray. Waxyaabihi ugu muhiimad badnaa isbeddellada waxay ahaayeen:

- Qoraalka in loo bixiyo magac cusub: Inkastoo qoraalkii ugu horreeyey uusan lahayn cinwaan rasmi ah oo ku dhex qornaa, waxaa si guud ahaaneed loogu yeeri jiray in uu ahaa "Heshiiska Dadweynaha Tirada Yar" ama "Heshiiska u dhaxeeya Waaxda Booliiska St. Cloud iyo Dadweynaha Tirada Yar. "Sannadkii 2017, kooxihii ka qeybgalaayey ayaa go'aansaday in ay qoraalka u bixiyaan magac kale oo ah "Heshiiska Waaxda Booliiska St. Cloud iyo Dadweynaha" si uu uga turjumo xilka booliiska ka saaran gebi ahaan

Dadweynaha St. Cloud. Isla qoraalka gudihiisa, meelihii lagu qoray "dadweynaha tirada yar" waxaa lagu beddelay in lagu qoro "dadweynaha."

- Caddaaladda iyo Dhexdhexaadnimada Booliiska: Qeybtii ahayd "Eexda Booliiska" waxaa lagu beddelay "Caddaaladda iyo Dhexdhexaadnimada Booliiska" si ay uga turjunto hiigsiga heshiiska. Isla qeybtan, qodobka 1-aad, "Nidaamka Digniinta Hore ee Shaqaalaha" waxaa lagu magacaabay "Laxisaabtanka Shaqaalaha Booliiska" oo waxaa loo beddelay si ay uga turjunto shaqada Waaxda Booliiska St. Cloud. Qodobka 2-aad, "Shaqaaleynta iyo Qorista Shaqaalaha" waxaa lagu daray in ay ka turjunto dedaalka hadda socda oo ah hab lagu shaqaaleynayo laguna sii haysan karo shaqaale ciidan ah oo iskudhafan. Qodobka 3-aad waa mid khuseeya uruurinta xogta eexda booliiska in ay noqoto mid ku lug yeelata wadahadal joogto ah. Qodobka 4-aad, sida qeybtan oo dhan, waxaa magacii lagu beddelay "Tababaridda Caddaaladda iyo Dhexdhexaadnimada Booliiska." Qodobka 7-aad, "Xaaladda Sharciga Soogalootiga," waxa loo beddelay in ay ka turjunto hadda magacyada jira ee hay'adaha fedetraalka iyo in ay caddeyso badqabidda dadweynaha deegaanka in ay tahay walaaca koowad ee Waaxda Booliiska St. Cloud.
- Walaacyada "Xaaladda Sharciga Soogalootiga" iyo wadashaqeynta dowladda hoose iyo federaalka ee saaxada siyaasadda hadda socota: Sidii ay ahayd sannadihii 2004-05, qeybta "Xaaladda Sharciga Soogalootiga" waxay ahayd mid kacsan oo in badan laga hadlay 2017-18. Dhibka jiray wuxuu ahaa xiriirka shaqada Waaxda Booliiska St. Cloud iyo ICE (Ciidanka Laanta Socdaalka iyo Xuduudaha), si gaar ah asal ahaanta wadashaqeyntaas iyo sharciga aasaaska u ah. Go'aan-gaarista la tixgeliyey waxay ahayd fikradaha Waaxda Booliiska St. Cloud, taageereyaasha soogalootiga, iyo ka-qeybgaleyaal aqoon iyo khibrad u leh sharciga. Kooxdu waxay isku raaceen in dib loo eego qeybtan oo ku jirtay heshiiska isla dibu-eegista koowaad ee sannadka oo ahayd bishii Jannaayo 2019.
- Habraaca Cabashada: Qeybta "Habraaca Cabashada" wax baa laga beddely si loo kala caddeeyo tallaabooyinka ku jira habraaca.
- Xiriirka Dadweynaha: Qeybta "Xiriirka Dadweynaha" waxaa laga dhigay in xoogga la saaro: kulan sannadle ah oo khuseeya nabadgelyada dadweynaha, la-xisaabtanka booiiska, kordhinta wadaxiriirka, iyo wadashqeynta ka dhaxeysa Waaxda Booliiska St. Cloud, Magaalada St. Cloud, iyo ururrada ah saxiixeyaasha.

Saxiixeyaasha
Saxiixeyaashii heshiiskii hore waxa ay ku taxan yihiin lifaaqa dambe.
Saxiixeyaasha wixii qoraalka laga saxay 2018 waxa ay ku taxan yihiin qeybta ugu dambeysa qoraakan.

Wax-ka-beddelkii 2021

Kulan sannadeedka Heshiiska Booliiska iyo Dadweynaha waxaa la qabtay 15-kii Julaay 2021. Waxa keliya ee laga beddelay Heshiiska waxa ay ahayd taariikhda kulanka sannadka oo laga soo beddelay Jannaayo iyadoo laga dhigay saddexda bilood ee ugu horreysa ee sannad kasta.

CADDAALADDA IYO DHEXDHEXAADNIMADA BOOLIISKA

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay leedahay oo ay ku sii dhaqmi doontaa oo ay dadka ogeysiin doontaa sharcigeeda la xiriira caddaaladda iyo dhexdhexadnimada booliiska. Taariikhda iyo sooyaalka Waaxda Booliiska St. Cloud ayaa dhiirrigelinaya oo shuruud ka dhigaya in uu ficilka booliiska ku saleysnaado habdhaqan oo uusan ahayn muuqaal.

1. La-xisaabtanka Ciidanka Booliiska

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay sameyn doontaa oo ay fulineysaa sharciyo ciidan oo caddeyn ku saleysan oo lagu xaqiijinayo caddaaladda iyo dhexdhexaadnimada booliiska, sida in aan aqoonsiga ciidanka loo qaadan karin in ay booliisnimadoodu tahay mid ku dhisan eexasho.

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay isha ku hayneysaa oo ay saameyn ku yeelan doontaa waxqabadka shaqaalaha iyagoo isticmaalaya korjoogteyn qaabeysan, qiimeynta shaqada, barnaamij kambuyuutar ah, "isticmaalidda awood" in lagula socdo, habraacyo shuruudo xirfadle oo qaabeysan, iyo in la adeegsado anshaxmarin lagu tiigsanayo horumar. Waaxdu waxa kale oo ay xaqiijineysaa shuruudaha habraaca lagu qaadanayo booliiska, sida baaris qotodheer in lagu soo sameeyo taariikhdoodii hore iyo in loo qiimeeyo cilminafsi ahaan iyadoo xoogga la saarayo shuruudaha la xiriira caddaaladda iyo dhexdhexaadnimada.

2. Habraacyada Shaqaaleynta Booliiska.

Waaxda Booliiska St. Cloud, iyaga oo si wadajir ah Heshiiskan ula saxiixaya ururrada dadweynaha, waxa ay:

a. Sii wadi doonaan inay soo qortaan, shaqaaleeyaan, oo ay haystaan booliis metali kara dadka kala duwan, oo qasdiguna waa in waaxda booliiska lagu arko heer ah kala duwanaansho ciidan oo ay ku metalayaan magaalada ay u adeegayaan.

b. Fulin doonaan barnaamijyo ay ku badinayaan inay soo qortaan, shaqaaleeyaan, oo ay haystaan booliis ah dadka tirada yar, iyo in laga hortago ama laga fogaado habdhaqanka iyo sharciyada shaqaaleynta in ay noqdaan ka-saarid iyo/ama takoorid.

c. Sii wadi doonaan in ay adeegsadaan shaqooyinka saacadaha yar ee booliiska in loo qorto booliis ka soo jeeda qowmiyado kala duwan oo dhigta kulleejka, iyo in laga sii dhigto booliis qabta shaqo buuxda iyada oo si shakhsi ah loogu marayo habraacyada shaqaaleynta.

3. Joogteyn ah Uruurinta Xogta Eexashada Booliiska.

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay yeeshay in ay wadahadal la sii yeelato ururrada dadweynaha iyo shacabka si loogu hagaajiyo sharciyada iyo habdhaqanka khuseeya caddaaladda iyo dhexdhexaadnimada booliiska sida: uruurinta iyo qorsheyaasha xogta, cabashada iyo dambibaarista, shaqaaleynta iyo tababarka, iyo joojinta gaadiidka, sida dadka loo baarayo iyo sida wax loo qabanayo, oo waxaa soo ifbixi karta in waxyaabo dheeraad ah laga sii beddelo Heshiiskan.

4. Caddaaladda Iyo Dhexdhexaadnimada Booliiska.

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay ciidankeeda shuruud uga dhigeysaa in ay soo maraan tababar hore iyo mid gudaha ah oo ku saabsan Caddaaladda iyo Dhexdhexaadnimada Booliiska, oo looga hadlayo dhibaatooyinka aasaasiga ah ee ku xeeran beegsiga ku saleysan isirka, eexda- booliiska ku jirta, iyo mabaadii'da guud ee la xiriira saameynta sinnaan la'aanta ku saleysan ee isirka iyo bulshada.

5. Isticmaalidda Kaarka Macluumaadka Shaqada.

Waaxda Booliiska St. Cloud waxaa ka go'an in ay ciidanka booliiska ah oo dhan dadka ay u adeegayaan u sheegaan aqoonsi ah magacyadooda. Si looga helo aqoonsiga, Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay u fududeyn doontaa kaararka macluumaadka shaqada ee booliis kasta. Waxa dhacaysa horjooge kasta oo ah booliis in uu xaqiijiyo in ay ciidanku helaan, wataan oo ay bixiyaan kaararka macluumaadka shaqada marka ay qabanayaan shaqadooda ciidanka booliiska. Ciidanka oo dhan waa khasab in ay helaan oo wataan kaarar ay Magaaladu bixiso oo ah kaararka macluumaadka shaqada oo daabacan. Jawaabta koowaad ee booliiska meel yimaada, iyo booliis kasta oo kale oo laga codsado waa in laga helo kaarka macluumaadka shaqada.

- Joojinta baabuurta oo dhan.
- Marka uu qof ka codsado booliiska magaca, lambarka aqoonsiga booliiska ama kaarka macluumaadka shaqada.
- Marka laga codsado, dhibbane kasta oo la aqoonsado ama dacwoode kasta oo taleefan ku soo codsada in la caawiyo.

Dhinaca dambe ee kaarka macluumaadka shaqada waa in ay ku qoran tahay digniin ah: "Wixii faallo ama walaac ah, soo garaac 650-3800." Digniintaas waa in ay ku qoran tahay afar luuqadood: Ingiriis, Soomaali, Isbaanish iyo Laawooshiyaan.

6. Oggolaanshaha Baarista Baabuurta.

Waxa jira arrimo badan oo booliiska u oggolaanaya inay baaraan baabuur, sida baaris ay u haystaan waraaq maxkamadeed, baaris ah in ay qof xiraan, baarista baabuur ka cararay, oggolaansho ah baarista ku lug leh faldambiyeed iska muuqda. Marka uu askari booiis ah codsado oggolaansho ah baaris, habraacyada soo socda waa in la raaco.

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay qireysaa isticmaalidda joojinta baarista baabuurta in ay ahaato tuhun macquul oo uu ujeedkuna yahay in la sameyn karo oggolaasho baaris ah in aysan marnaba noqoneyn wax gar ah oo ay dhaawacayso xiriirka u dhaxeeya ciidanka nabadgelyada iyo dadweynaha.

Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay ambaqaadi doonaan sharci shuruud ku ah ciidanku in ay haystaan tuhun cad oo macquul ah ka hor inta codsan baaris ay ku sameyn doonaan qof ama gaadiid.

Ciidanku waxa keliya oo ay codsan karaan oggolaanshaha baarista qof ama gaadiid waa marka ay haystaan tuhun cad oo macquul ah keliya, ka hor inta aysan codsan oggolaansho ah baarista, oo waa in qofka ama gaadiidka la baari doono lagu hayo in ay ku lug leeyihiin faldambiyeed. Xaqiiqooyinka sidaas ah waxaa ku jiri kara: wakhtiga maalinta, ficillo qofka gaar ku ah, iyo macluumaad laga helay dacwooyin dadweyne, ama waxyaabo kale oo ah wax cad oo ay booliisku arkaan.

Marka la codsanayo oggolaansho baarista ah, waa in ay ciidanku raacaan talooyinka soo socda:

a. Ciidanku waa in ay haystaan tuhun cad oo macquul ah oo ku rumeysan yihiin qof, dhisme ama gaadiid ay tahay in la baaro in ay ku lug lahaan karaan faldambiyeed.

b. Ciidanku waa in ay qofka ay ka rabaan Oggolaanshaha Baarista Baabuurta kula hadlaan sida soo socota si ay ugu sameeyaan baarista. Oggolaanshuhu waa in uu noqdo cod ahaan, oo aamusnaan lama yeelayo.

Oggolaanshaha Baarista Baabuurta

Waxaan rabaa in aan baaris kugu sameeyo adiga (ama baabuurkaaga).

Sababta aan rabo in aan baarista ugu sameeyo adiga ama baabuurkaaga waa _____.

Waa in aad ogaato in aad xaq u leedahay oo aad diidi karto oggolaanshaha ah in lagu baaro adiga iyo gaadiidkaaga.

Haddii aad yeesho oggolaanshaha, markii aad rabto ayaad joojin kartaa.

Haddii aad yeeli weydo oggolaansho ah in la sameeyo baarista, wax aargoosi ah laguuguma sameyn karo in aad diidday awgeed.

Ma fahmeysaa waxa aan hadda kuu sheegay?

Ma ku baari karaa? Baabuurkaaga ma baari karaa?

c. Haddiiay baarista ka soo baxdo xarig ama wax la qabanayo, askarigu waa in uu ku caddeeyo warbixinta macluumaad la caddeyn karo oo macquul ah oo sababay baarista, sida qofka loola hadlay, iyo gaar ahaan in oggolaansho laga helay.

d. Haddii baaristu aysan sababin xarig ama wax la qabanayo, askarigu waa in uu meel ku qoro ama hadalka raacsado in uu codsi oggolaansho dhacay, oo dabadeedna si kooban u sharxo macluumaadka la caddeyn karo ee macquulka ah ee ku khasbay codsiga baarista.

e. Baaris kasta oo ku sal leh dambibaaris socota oo ku sii lug leh sabab loo qaateen ah ama arrin baris ah oo la isku xirayo uma baahna hadal. Markay jirto xaalad noocan ah, ciidanku waxay sameynayaan baaris ah loo qaateen, xirid, helid ah waraaq maxkamadeed, ama alaab baabuur ku jirta.

7. **Xaaladda Sharciga Soogalootiga.**

Waaxda Booliiska St. Cloud waxay ogsoon yihiin oo qiimeynayaan kala-duwanaanshaha dadweynaha ay u adeegaan. Ujeeddada qorshahan waa in ciidanka lagu hago arrinta xaaladda sharciga soogalootiga iyo in la xaqiijiyo ilaalinta oo noqota caddaalad ay u siman yihiin dadka oo dhan, oo aan loo eegin xaalka sharciga soogalootiga.

Walaaca koowaad ee waaxda waa badqabidda dadweyanaha. Hase yeeshee, Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay ula shaqeyn doonaan Ciidanka Laanta Socdaalka iyo Xuduudaha (ICE) ee Mareykanka sida ay ula shaqeeyaan hay'adaha kale ee ka shaqeeya amniga. Waxaa sharci ahaan u dhigan Waaxda Booliiska St. Cloud in aysan ciidanka oo dhan xiri karin ama qaban karin qof shakhsi ah iyadoo ay ugu wacan tahay in lagu tuhmo jebinta sharciga soogalootiga, marka laga reebo codsi uga yimaada oo ay ku caawinayaan ICE. Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay masuul ka tahay in ay baarto oo ay la xiriirto qof kasta oo ay rumeysan tahay in uu ku lug leeyahay faldambiyeed. Haddii ay baarista ka dib dhacdo arrin ah xirid loo qaateen ah, ciidanku waxa ay sameyn karaan xirid ah xadgudub aan la xiriirin xaaladda sharciga soogalootiga ee qofka.

Ciidanku waxa ay u baahan karaan caddeyn sheegeysa aqoonsiga qofka oo waxa ay weydiin karaan dukumiinti marka sharcigu u oggol yahay. Wax ah aqoonsi sawir leh oo ay bixisay dalkii asalkii hore ee qofka, sida leysanka baabuurka, baasaboor, waraaqo qunsul (waraaqaha xafiiska danjiraha), ayaa noqon kara waxa la aqbali karo oo waa in qofka loola dhaqmo si aan ka duwaneyn sida qofka haysta oo soo bixiya leysanka baabuurka ee Minnesota ama kaarka aqoonsiga ee ah nooca gobolka. Waxa aqoonsiga sawirka leh ee ay bixiyaan Gobolka Minnesota, ama aqoonsi kale oo sawir leh, waa waxa noqon kara caddeynta aqoonsiga haddii aysan jirin sabab kale oo ay ciidanku rumeysan yihiin oo ah in ay su'aal ka soo baxdo aqoonsiga qofkaas.

HABRAACA CABASHADA

Waaxda Booliiska St. Cloud waxay dadka si adag ugu sheegayaan inay kala soo xiriiraan wixii ah su'aalo iyo/ama khuseeya habdhaqanka booliiska, habaacyadooda, ama ficilka qorshahooda. Si loogu dedaalo in la unko jawi waxtar leh oo waaxda booliiska loogala soo xiriiro wixii macluumaad ah, waxaa jira habraacyo cabasho oo kala ah mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn. Labadaas hab waxaa hagaya qorshe ficil ah oo daahfuran oo ay dadka oo dhan ku soo weydiisan karaan wixii ah su'aalo, walaaca ay sheeganayaan, iyo, markii ay lagama maarmaan noqoto, in ay cabasho soo xareystaan. Waaxda Booliiska waxay raalli ka tahay oo ay baareysaa cabashooyinka oo dhan marka loo soo gudbiyo waaxda.

1. Habraaca cabashada aan rasmiga ahayn

   Habraacan wuxuu bilaabanayaa marka uu qof su'aal am walaac ka qabo booliis ay wada macaamileen, qorshaha ficilka ama habraacyada waaxda booliiska, ama booliisku sida ay uga jawaabaan xaalad ama arrin markaas taagan. Waxaan dadka si adag ugu sheegeynaa inay booliiska iyo maamulka arrinta kula xiriiraan taleefan ahaan, **si** shakhsi ah, in ay u soo diraan waraaq ama farriin ah boostada intarnetka ah. Yoolku waa in ay macluumaadka helaan shaqaalaha booliiska oo arrimaha looga hadlo iyada oo loo sharxayo si wadahadal furan ah iyo/ama si ah ficil lagu saxayo arrinta marka ay taagan tahay. Iyada oo uu dabiiciyan habraacan yahay mid aan rasmi ahayn, heerka caddeynta waxa uu ku xirnaan doonaa xaalka qofka. Si ay noqotaba habraaca cabashada oo dhan waa in loo sharxo qofka loo gudbinayo iyadoo waxa lagu sii kala dooranayo sida baratakoolka cabashada ah rasmiga.

2. Habraaca cabashada rasmiga ah

    a. Waaxda Booliiska St. Cloud waxay leedahay habraac cabasho rasmi ah oo xubin kasta oo dadweynaha ka mid ah u oggolaneysa in ay soo gudbistaan cabasho khuseysa habdhaqanka booliiska ama cabasho la xiriirta qorshaha ficilka ama habraacyada Waaxda Booliiska.
    b. Cabashada waxay bilaabaneysaa marka lala soo xiriiro Waaxda Booliiska St. Cloud. Waaxda Booliiska St. Cloud waxay leedahay Shuruudaha Xirfadlaha Booliiska oo kugu caawinaya in aad diyaarsato bilowga cabashada iyo in la sameeyo dambibaaris. Cabashadu waxa laga sameyn karaa booliis kasta, oo dabadeedna kiiska waxaa loo gudbinayaa maamulaha awoodda u leh ee ugu habboon in uu bilaabo dambibaarista.
    c. Qofka sameynaya cabashada waxaa la weydiinayaa in uu saxiixo cabasho rasmi ah oo sarkaalka dambibaarista u keeno hadal cod-ahaan u duuban. Marka la diido in la saxiixo cabashada sidaas kuma joogsanayo habraaca dambibaarista, hase yeeshee waxaa go'aan laga gaarayaa haddii ay maamulku saxiixi doonaan cabashada iyaga oo ku saleynaya macuumaadka la hayo. Hadal codka ah ee duuban waxa uu muhiim u yahay habraaca rasmiga ah. In kastoo aysan diidmada codka duuban joojin doonin dambibaarista, waxa ay caqabad ku noqon kartaa in la si hufan oo buuxda loo dhammeystiro dibu-eegidda arrinta.
    d. Dambibaaristu waxay ku bilaabaneysa macluumaadka caddeymaha oo dhan, sida hadalka qofka cabanaya, warbixinta booliiska oo dhan, iyo caddeyn kasta sida cod/fiidiyow duuban oo khuseysa cabasho, oo waa in la uruuriyo oo lagu sameeyo dibu-eegis. Qoraal kooban ayaa laga sameynayaa macluumaadka iyo ficillada ay sameeyaan dadkii ku lug lahaa oo dhan. Waraaqaha cabashada waxaa eegaya maamulka sare, goorta la go'aamin doono haddii loo baahan doono macluumaad dheeraad ah iyo/ama dambibaaris badan in loo baahan doono.
    e. Haddii loo baahdo macluumaad dheeraad, dambibaaris buuxda ayaa lagu sameyn doonaa askartii ku lug lahayd arrinta iyo markhaatiyada la heli karo. Hadal kasta waa la duubi doonaa. Qeyb kasta oo ka mid ah Sharciga Gobolka Minnesota ayaa la raaci doonaa inta ay socoto dambibaarista iyadoo loo cuskanayo Sharciga Xuquuqaha Booliiska Minnesota. Caddeyn dheeraad ah ayaa la keeni karaa iyo/ama la eegayaa, sida cod iyo/ama fiidiyow laga keeno meelo ka baxdan waaxda booliiska. Marka la dhammeystiro dambibaarista macluumaadka la soo caddeeyey oo dhan waa warbixin rasmi ah oo qoran. Warbixinta ugu dambeysa waxaa loo bandhigayaa Taliyaha Booliiska iyo/ama Taliyaha qofka uu u magacaabo dibu-eegista iyo go'aanka kamadambeysta ah.
    f. Sida uu dhigayo xeerhoosaadka magaalada, Guddoonka Dibu-eegista ee Dadwewynaha St. Cloud ayaa la adeegsanayaa iyadoo la cuskanayo xeerka hagaya xukunka iyo ujeedka.

3. U-qareemid

Haddii uu jiro qof ay ku adag tahay in uu u keensado cabasho Waaxda Booliiska, qofkaas waxa uu isticmaali karaa qof u qareema oo soo raaca inta ay dacwadu u socoto. Qofka u qareemaya qof kale waxa uu noqon karaa qof kasta oo uu dacwooduhu soo doorto.

Ururrada saxiixaya heshiiskan, iyo sidoo kale ururrada aan macaashdoonka ahayn ee bulshada oo khibrad u lahaan kara habraaca iyadoo laga heli karo talooyin dheeraada ah.

XIRIIRKA DADWEYNAHA

1. Iyadoo lala shaqeynayo ururrada dadweynaha ee saxiixaya Heshiiskan, Waaxda Booliiska St. Cloud iyo Guddoonka Xuquuqda Aadanaha ee St. Cloud ayaa sannad kasta qaban doona kulan dadweyne. Ujeedka kulanka dadweynaha waa in lagu soo saaro warbixinta arrimo wadjir ah oo loogu sii soconayo danaha dadweynaha iyo booliiska si loogu sii hagaajiyo xiriirka dadweynaha, iyo in lagu qiimeeyo waxtarka uu leeyahay heshiiskan.

2. Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay la xisaabtameysaa booliiskooda markay ku jiraan iyo marka aysan ku jirin shaqada, sida ay dhigayaan sharciyada Waaxda Booliiska St. Cloud.

3. Waaxda Booliiska St. Cloud iyo xafiiska Duqa-Magaalada ee St. Cloud waxay si wadi karaan in ay sameeyaan oo ay taageeraan barnaamijyada ku saleysan dadweynaha si loogu wada dedaalo in lagu horumariyo oo lagu kordhiyo wada-hadalka, si loogu xoojiyo xiriirrada jira, iyo si loogu dhiso xiriirro cusub oo lala yeesho dadweynaha, sida dadka lagu metalayo Heshiiskan. Marka ay suurowdo, Waaxda Booliiska St. Cloud waxay dadweynaha kala hadlayaan in la hubiyo in barnaamijyada la fulinayo iyada oo laga taxaddarayo baahida gaarka ah ee dadweynaha.

4. Waaxda Booliiska St. Cloud waxay dibu-eegis ku sameyn doonaan sharcyada haddii ay ku jirto isri ahaan in uu farqi u dhaxeeyo sida dadka loola dhaqmayo.

5. Ururrada dadweynaha ee saxiixay Heshiiskan waxa ay taageersan yihiin waa dedaalka ugu habboon ee macquul ah in ay Waaxda Booliiska St. Cloud ku fuliso Heshiiskan.

6. Ururrada iyo dadka u qareemaya qof dacwoode ah waxaa laga filayaa in aysan marna ka hadlin ama cidna u sheegin wixii macluumaad ah oo la xiriira ashtakeyn ah dhaqanxumo laga sheegtay booliis ilaa ay Waaxda Booliiska marka hore sheegto warbixintaas. Ka hor inta aysan ururka qofka loola xiriirayo ama Waaxda Booliiska sheegin wax macluumaad ah, labada dhinac ayaa kulmaya oo bixinaya wixii warbixin ah oo ay sii sheegayaan.

7. Ururrada iyo shakhsiyaadka qeybta ka ah Heshiiskan waxay isku raacsan yihiin in ay ka qeybqaataan dedaallo dadweynaha lagu barayo sharciyada booliiska, habraacyada iyo waxyaabo kale. Haddii ay awoodaan, ururrada ayaa yeelaya in ay Heshiiskan uga qeybqaataan baraha intarnetka, baraha xiriirka bulshada, iyo warbaahinta kale. Si gacan looga geysto hawsha, Waaxda Booliiska St. Cloud iyo Magaalada St. Cloud ayaa Heshiiskan warbaahin kasta ugu diyaarin doona sida ugu habboon.

8. Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota, Xafiis Goboleedkeeda St. Cloud ayaa iskaashi la yeelan doona dadweynaha deegaanka ku xeeran St. Cloud si ay dadweynaha/booliiska uga helaan tababar ah xiriirrada Waaxda Booliiska St. Cloud iyo Guddoonka Dibu-eegista ee Dadwewynaha St. Cloud iyadoo lagu- saleynayo fikradaha dadweynaha iyo codsigooda. Waaxda Booliiska St. Cloud waxa ay ku caawin doonaan tasiilaadka lagu bixinayo tababarka.

KULAMADA MUSTAQBALKA EE U DHAXEYN DOONA WAAXDA BOOLIISKA ST. CLOUD IYO DHINACYADA KALE EE HESHIISKA

1. Heshiiskan waxaa dibu-eegis ku sameyn doona Waaxda Booliiska iyo dhinacyada kale ee heshiiska sannad kasta saddexdii bilood mar laga bilaabo sannadka ku xiga ee Heshiiska la saxiixo. Dhinacyadu waxa ay u kulmayaan in ay sameeyaan dibu-eegista arrimo badan oo ah dadweynaha iyo Waaxda Booliiska, oo dabadeed waxa ay la kulmayaan Waaxda Booliiska saddexdii biloodba mar si ay u go'aamiyaan haddii lagu khasaban yahay in wax laga beddelo Heshiiska.

2. Dhinacyada heshiiskan waxay fahamsan yihiin in ay arrimo ah walaac iyo degdeg ka soo ifbixi karaan Waaxda Booliiska St. Cloud iyo dadweynaha. Markay arrimo noocaas ah dhacaan, waxaa shir ku baaqi kara Waaxda Booliiska St. Cloud ama dhinacyada kale ee Heshiiskan si looga wada hadlo oo loo wadaago fikrado la xiriira arrimaha walaaca iyo degdegga ah.

BEDDELAADDA HESHIISKA

Ma dhacayso wax beddelaad ah oo lagu sameyn karo Heshiiskan haddii aan laga dhigin qooraal oo aysan wada saxiixin dhinacyada Heshiiskan.

Xaqiijinta iyo axdiga kor ku xusan waxaa halkan isku raacay oo la saxiixay iyadoo markhaati laga yahay maanta oo ah 22ka Feberaayo, 2018.

ST. CLOUD POLICE DEPARTMENT

_____
Wm. Blair Anderson, Taliyaha Booliiska

CITY OF ST. CLOUD

_____
Mudane Dave Kleis
Duqa-Magaalada St. Cloud

ADOM LLC

_____
Eunice Adjei, Guddoomiye

AFRICAN AMERICAN MALE FORUM

_____
Dr. Freddie J. Walker

AFRICAN COALITION NETWORK (ACN)

_____
Isaac Owens, Guddoomiye

AFRICAN YEN CATERING SERVICES

_____
Oluwatoyin Adetunji, CEO

ASAMBLEA DE DERECHOS CIVILES

_____
Patricia Keeling, Guddoomiye

_____
Ma Elena Gutierrez, Wax-ka-Aasaase

_____
Mónica Segura-Schwartz, Hoggaamiye

_____
Gladys K. Gutierrez-Anaya, Abaabule

CENTRAL MINNESOTA COMMUNITY EMPOWERMENT ORGANIZATION

_____
Jama Alimad

CENTRAL MINNESOTA FREE THINKERS

_____
Dennis Strassburg, Guddoomiye

FIRST PRESBYTERIAN CHURCH

_____
Baadari Darin Seaman

_____
Herbert Halverson

FIRST UNITED METHODIST CHURCH OF THE ST. CLOUD REGION

_____
Baadari Leah Rosso

_____
Baadari Jim Towler

GRIP/ISAIAH

_____
Tamara Calhoun, Hoggaamiye

HANDS ACROSS THE WORLD

_____
Brianda Cediel, Aasaase iyo Agaasime Sare

HIGHER GROUND CHURCH OF GOD IN CHRIST

_____
Baadari James Alberts II

_____
Deacon Charles Ferguson

IMMIGRANT LAW CENTER OF MINNESOTA

_____
John Keller, Agaasime Sare

JOVANOVICH, KADLEC & ATHMANN LAW

_____
Thomas G. Jovanovich

JUGAAD LEADERSHIP PROGRAM AND 2017 BUSH FELLOW

_____
Emmanuel Oppong

REGIONAL HUMAN RIGHTS COMMISSION

_____
Eunice Adjei, guddoomiye

ST. CLOUD ACLU PEOPLE POWER

_____
Jerilyn Petersen

_____
Marge Rakow

_____
Greg Schroeder

ST. CLOUD AREA SOMALI SALVATION ORGANIZATION (SASSO)

_____
Mohamoud Mohamed, Aasaase iyo Agaasime Sare

TRIPICIANO IMMIGRATION LAW

_____
Laura Tripiciano

#UNITECLOUD

_____
Natalie Ringsmuth, Agaasime

SHAKHSIYAADKA XUBNAHA DADWEYNAHA

_____
Oyinlola Adeyemi, Arday, St. Cloud State University

_____
Meredith Barth

_____
Sonja Hayden Berg

_____
John Omondi, Xubin Guddoonka Dibu-eegista Booliiska

_____
Mohamed Soumah

Lifaaq

Saxiixeyaashii Heshiiskii 2005

- Waaxda Booliiska St. Cloud -Taliyaha Booliiska Dennis Ballantine
- African American Male Forum - John McCray
- Hands Across the World - Brianda Cediel
- Higher Ground Church of God in Christ - Baadari James Alberts II
- Hispanic Business Association - Nick Zermeno
- ISAIAH's Great River Interfaith Partnership - Deb Anderson
- Nu Way Missionary Baptist Church - Baadari Willie McAfree
- Refugee Employment and Social Services of Lutheran Social Services - Mohamed Hassan Yusuf
- Resurrection AME Zion Church - Baadari Yolanda Lehman
- St. Cloud Area Somali Salvation Organization (SASSO) - Mohamoud Mohamed
- St. Cloud Korean Baptist Church - Pok Hughes
- United Migrant Opportunity Services (UMOS) - Heladio (Lalo) Zavala